



Ururada farshaxanka, maktabadda oo la siiyay abaalmarino ku saabsan shaqaalaha PPS

Macallimiinta iyo maamulayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa lagu maamuusi doonaa kulamada soo socda ee loogu talagalay macallimiinta farshaxanka iyo maktabadaha dugsiya.

Saddex ka tirsan xubnaha shaqaalaha PPS ayay Ururka Waxbarashada Farshaxanka ee Oregon ku maamuusi doonaan kulankooda xilliga dayrta ee Oktoobar 6 ka dhacaya Rockaway Beach.

Waxay kala yihiin:

Randy Maves: Macallinka Dugsiga Sare ee Madison oo loo aqoonsan doono in uu yahay Macallinka Farshaxanka ee Sanadka. Abaalmarinta waxaa la siiyaa macallinka farshaxanka oo firfircoon oo ka tirsan Oregon si loo aqoonsado "guulaha iyo adeegyada aan caadiga ahayn ee gobolka iyo qaranka."

Jamin London-Tinsel: Macallinka Dugsiga Sare ee Grant waxaa loo xushay Abaalmarinta Macallinka Farshaxanka Dugsiga Sare ee Sanadka, taasi oo loogu talagalay macallimiinta dugsiya sare iyo kuwa wax baraya fasallada 9-12.

Kristen Brayson: Maamulaha barnaamijka ee Bandhiga Farshaxanka iyo Muuqaalka ee PPS ayaa heshay Abaalmarinta Adeega Gaarka ah ee Xirfadeed. Brayson waxay kor kala socotaa barnaamijyada farshaxanka ee degmada waxayna gacanta ku haysaa bandhiga sanadlaha ah ee HeART of Portland.

OAEA waa urur xirfadeed loogu talagalay macallimiinta farshaxanka. Magacaabista abaalmarinada waxaa soo gudbiya macallimiinta kale ee farshaxanka, iyada oo xubnaha guddigu qiimeyaan sharaxaadaha laga bixiyay qofka la soo magacaabay taasi oo la eego ahaanshaha macallimiinta farshaxanka iyo ka qayb qaadashadooda iyo dadaalkooda ku aadan ardaydooda, dugsigooda iyo bulshadooda.

Dhanka kale, maamulaha Beverly Cleary **John Ferraro** ayaa la siin doonaa Abaalmarinta Sanadka ee Maamulaha Dugsiga iyada oo ay siin doonaan Ururka Maktabadaha Dugsiga ee Oregon. Ferraro waxaa loo aqoonsan doonaa taageeradiisa adag ee barnaamijyada maktabada dugsiya ee xaflada dhacaysa Oktoobar 13 ee ka dhacaysa Dugsiga Sare ee Wilsonville.

Hambalyo ayaanu leenahay shaqaalaheena PPS.